TALLAALKA HABLO-BAASTA

WAXA AY TAHAY INAAD OGAATO

1 Maxaa la isku tallaalayaa?

Hablo-baastu (oo sidoo kale la dhaho varicella) waa cudur carruurnimada ku badan. Badanka waa mid dhexe, laakiin halis ayuu noqon karaa, gaar ahaan carruurta yaryar iyo dadka waaweyn.

- Wuxuu keenaa finan yaryar, cuncun, xummad, iyo daal.
- Wuxuu horseedi karaa infakshan jidheed oo daran, nabarro, oof-wareen, dhaawac maskaxeed, ama geeri.
- Fayraska hablo-baastu waxa u ku faafi karaa hawada, ama taabashada dheecaanka nabarka hablo-baasta.
- Qofka qaba hablo-baas wuxuu yeelan karaa finan xanuun badan oo la dhaho nabarro sannado kadib.
- Kahor tallaalka, qiyaastii 11,000 oo qof ayaa cusbitaalka loo dhigi jiray hablo-baas awgeed sannadkii kasta Maraykanka.
- Kahor tallaalka, qiyaastii 100 qof ayaa u dhiman jiray hablo-baas Maraykanka sannadkii.

Tallaalka hablo-baastu waxay kahortagi kartaa hablo-baasta.

Badanka dadka hela tallaalka hablo-baastu heli maayaan hablo-baastu. Laakiin haddii qof la tallaalay hablo-baas ku dhacdo, aad ayey mid dhexe u noqon doontaa. Waxay yeelan doonaan finan tiro yar, waxay u dhaw yihiin inay xummaddu ku yaraato, horena way u bogsan doonaan.

2 Ayaa helaya tallaalka hablo-baasta iyo goorma?

Soo noqnoqda

Carruurta waligood aanay hablo-baas ku dhicin waa inay helaan 2 qiyaasood oo tallaalka hablo-baasta ah da'ahan:

Qiyaasta 1aad:	12-15 bilood jir
Qiyaasta 2aad:	4-6 sano jir (waxa la siin karaa xilli hore, haddii ugu yaraan 3 bilood kasoo wareegay qiyaasta 1aad)

Dadka da'doodu 13 jir ama ka weyn tahay (kuwaas oo waligood aanay ku dhicin hablo-baas ama helay tallaalka hablo-baasta) waa inay helaan 2 qiyaasood ugu yaraan 28 cisho isku jira.

Tallaalka Dabaqabataynta

Qofkii aan si buuxda uga tallaalayn, waligiina aanay ku dhicin hablo-baas, waa inuu helaa hal ama laba qiyaaso oo ah tallaalka hablo-baasta. Wakhtiyeynta qiyaasahani waxay ku xidhan tahay da'da qofka. Waydii bixiyahaaga.

Tallaalka hablo-baasta waxa la siin karaa xilli la mid ah tallaallada kale.

> Qoraalo: "Iskujirro" tallaal oo la dhaho **MMRV,** oo ka kooban tallaalada hablo-baasta iyo MMR, ayaa laga siin karaa halkii labada tallaal dadka 12 jirka ama kayar.

3 Dadka qaar waa inaya helin tallaalka hablo-baasta ama waa inay sugaan

- Dadku waa inayna qaadan tallaalka hablo-baasta hadday lahaan jireen dareen-celinta xasaasiyad halis ah qiyaas hore oo tallaalka hablo-baasta ah ama jelatin ama antibayootik neomycin.
- Dadka si dhexdhexaad ah ama daran u xanuusanaya xilliga mudista loo qabtay waa inay badanka sugaan illaa ay bogsanayaan kahor inta aanay qaadan tallaalka hablo-baasta.
- Haweenka uurka lihi waa inay sugaan helista tallaalka hablo-baasta illaa kadib intay dhalayaan. Haweenku waa inayna uuraysan 1 bil kadib qaadashada tallaalka hablo-baasta.
- Dadka qaar waa inay ka hubiyaan dhakhtarkooda haddii ay tahay inay qaataan tallaalka hablo-baasta, oo ay kujiraan cid kasta oo:
  - Leh HIV/AIDS ama cudur kale oo saameeya habdhiska difaaca
  - Lagu daawaynayo daawooyin saameeya habdhiska difaaca, sida steroids, 2 toddobaad ama kabadan
  - Leeyahay nooc uun kansar ah
  - Uu qaadanayo ku daawayn kansar ee shucaac ama daawooyin
- Dadka dhawaanta lagu shubay dhiig ama la siiyey wax dhiig kasoo jeeda waa inay waydiiyaan dhakhtarkooda xilliga ay dhici karto inay helaan tallaalka hablo-baasta.

Weydiiso bixiyahaaga macluumaad dheerad ah.

4 Waa maxay halisaha tallaalka hablo-baastu?

Tallaal, sida daawada kale, wuxuu awoodaa inuu keeno dhibaatooyin halis ah, sida falgallo xasaasiyadeed oo daran. Halisaha tallaalka hablo-baasta ee sababidda waxyeelo halis ah, ama geeri, aad iyo aad ayey u yar tahay.

Qaadashada tallaalka hablo-baasta ayaa aad uga hawl yar qaadista cudurka hablo-baasta. Dadka hela tallaalka hablo-baasta badankoodu wax dhib ah kalama kulmaan. Dareen-celinta waxay badanka aad u dhici karaan kadib qiyaasta hore marka la barbardhigo ta labaad.

Dhibaatooyinka Dhexe

- Caabuqa ama bararka halka laga muday (qiyaastii 1, 5 carruura iyo ilaa 1, 3 kuray ama dad waaweyn ah)
- Xummad (1 qof 10 qof, ama kayar)
- Finan dhexe, ilaa bil kadib tallaalka (1 qof 25 qof). Waa suurgal dadkani inay qaadsiiyaan xubnaha kale ee qoyska, laakiin tani aad iyo aad ayey naadir u tahay.

Dhibaatooyinka Dhexdhexaadka ah

- Suuxdin (isgundhin ama indho taag) ay keentay xummad (aad u dhifdhif ah).

Dhibaatooyinka Daran

- Oof-wareen (aad u naadir ah)

Dhibaatooyinka kale ee halista ah, oo ay kujiraan falgalo maskaxeed oo daran iyo dhiig yaraan, ayaa la soo tabiyaa tallaalka hablo-baasta kadib. Tani marmar dhif ah uunbay dhacdaa markaa khabiiradu ma sheegi karaan inuu sababay tallaalku iyo in kale. Hadduu sababay, aad iyo aad ayey naadir u tahay.

> Qoraalo: Qiyaasta u horraysa **MMRV** ee tallaalka waxa la socda finan yaryar iyo xummad badan marka loo eego tallaalka MMR iyo varicella oo si kal gaar ah loo siiyo. Finan ayaa la soo tabiyey illaa 1 qof 20kii qofba iyo xummad 1 qof 5tii qofba.
>
> Suuxdimaha ay keento xummaddu ayaa sidoo kale la tabiyaa in badan MMRV. Kuwani waxay dhacaan 5-12 cisho kadib qiyaasta hore.

5 Ka waran hadduu jiro dareen-celin dhexdhexaad ah ama darani?

Maxay tahay inaan raadiyo?

- Xaalad kasta oon caadi ahayn, sida xummad badan, dacfi, ama isbeddel habdhaqan. Calaamadaha dareen-celinno xasaasiyadeed oo halis ah waxa kujiri kara adayg neefsiga ah, xabeeb ama hiinraag, cuncun, cawlaan, wadnaha oo dhakhso u garaaca ama dawakhsanaan.

Maxay tahay inaan sameeyo?

- **Wac** dhakhtar, ama u hel qofka dhakhtar isla markaas.
- **U sheeg** dhakhtarkaaga waxa dhacay, taariikhda iyo wakhtiga uu dhacay, iyo marka tallaalka la siiyey.
- **Weydii** bixiyahaaga inuu ka warbixiyo dareen-celinta adiga oo buuxinaya foomka Nidaamka Ka Warbixinta Dhacdada Daran ee Tallaalka (VAERS).

  Ama waxaad ku fayl garayn kartaa warbixintan websaaydka VAERS **www.vaers.hhs.gov**, ama adoo wacaya **1-800-822-7967.**

  VAERS ma bixiso talo caafimaad.

6 Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka

Barnaamij heer fadaraal ah ayaa loo abuuray si loo caawiyo dadka ay dhici karto inuu waxyeelay tallaalku.

Wixii tafaasiil kusaabsan Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka, wac **1-800-338-2382** ama booqo websaaydka barnaamijka **www.hrsa.gov/vaccinecompensation.**

7 Sideen wax dheerad ah uga ogaan karaa?

- Weydii bixiyahaaga. Waxay ku siin karaan la socodka bushqadda tallaalka ama kuu soojeedin karaa ilo kale oo macluumaad.
- Wac waaxda caafimaadka xaafadda ama gobolkaaga.
- La Xidhiidh Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC):
  - Wac l**1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)**
  - Booqo websaaydka CDC: **www.cdc.gov/vaccines**

DEPARTMENT OF HEALTH AND HUMAN SERVICES
Centers for Disease Control and Prevention

Vaccine Information Statement (Interim)
Varicella Vaccine (3/13/08) - Somali 42 U.S.C. § 300aa-26

Translation provided by the Minnesota Department of Health